

Hadda wixii 50 sano ka weyn waa la talaalayaa

Västervik waxay tijaabo ku wadaan in dadka balan la'aan iska yimaadaan oo la talaalo. Adiga 50 jirka ah amaba ka weyn adoon wicin baad tegi kartaa. Waa maalinta 9-ka bisha juun saacadaha 16:30- 19:30 xarunta caafimaadka ee Esplanaden. Waase inaad kaarka aqoonsiga wadataa.

Warqaddaan "Waxa ka cusub Karoonaha" baad ka aqrisan kartaa hadii magaaloyin kale oo aan Västervik ahayn saasoo kale yeelaan.

Gobolku waxaa uu fududaynayaa in la samaysto balanta talaalka. Waxaad wici kartaa telefoonka 0480-844 44 si' aad balan u samaysato. Riix 2. Kadib dalbo magaalada kuugu dhaw.

- Riix 1= Kalmar
- Riix 2 = Oskarshamn
- Riix 3:= Västervik

Sug in cid kaa qabato ama telefoonkaada u reeb ayagaa kusoo wiciye.

Xataa toos baad u wici kartaa xarumaha caafimaadka.

Ayaguse waxay jecel yihiin in aad balanta ka samaysato beyjka 1177.se, macluumaadku beyjku af Iswiidish iyo Ingiriis bay ku qoran yihiin.

Inkasta oo ay hadda faafista cudurka ee waddanka ay yartahay haddana, weli waa muhiim in dad badani is talaalaan. Markaa baan karoone joojin karnaa . Yoolku wuxuu yahay in dadkoo idil la talaalo intaanu samarka dhamaan.

Isbadal Sharciyo si loo joojiyo fididda

Hay'adda caafimaadka ee qaranka iyo tan gobolkaba waxay go'aansadeen in sharciyada qaar la bedelo laga bilaabo 1-da bisha Juunyo, laakiin sharciyada guud weli waa sidoodii. Sida kala fogaanshaha, ku ekow guriga oo isbaar hadaad xanuun san tahay. Xataa hadii lagu talaalay.

Haddii dadkoo idil raacaan taladaas oo in badana is talaasho, hay'adda caafimaadku waxay aaminsantahay in sharciyada iyo mamnuucidaba laga maarmi doono. Laakiin wax deg deg ku dhacaya ma aha.

Laga bilaabo 1-da juunyo inkabandan intii hore oo dad ah ayaa goobaha diimaha, tiyaatarada iyo tartamada kubadda cagta ka qayb geli kara. Oo 50 qof baa kulmi kara haddii qof waliba fadhiisanayo kursi u gaar ah. Haddiise meeshu dibaddu tahay intaa in ka badan baa kulmi kara. Maqaayadaha waxay furnaan karaan ilaa iyo tobanka (22:30) fiidnimo.

Dad badan baa isweydiinaya in xaflado iyo kulamo xiritaanka iskuulka ah la samaysan karo. Laakiin hay'adda caafimaadka waxay leedahay waxaa kulmi kara oo keliya qoysaska iyo inta ay is yaqaanaan. Haddii la kiraysto meel lookaal ah si xaflad loogu dhigto waxaa loo ogolyahay weli 8 ruux oo keliya.

Haddii wax waliba hagaagaan oo fidida cudurkuna kordhin, waxaa soo bixi doona sharciyo cusub 1-da bisha julaay.



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa.

Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay'adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay'adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka, hay'adda caafimaadka ee gobolka iyo mas'uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhex dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



facebook.com/krissamverkan.kalmar